This page was exported from - Laashin Iyo Hal abuur
Export date: Thu Nov 23 13:13:02 2017 / +0000 GMT

Sooyaalkii Siyaad dheryodhoob W/Q: Maxamed Xuseen Faarax

Sooyaalkii Siyaad dheryodhoobe Siyaad dheryo dhoob ayaa ahaa nin Garaad badan, hubaal waxaa aan qabaa inuu yahay qof keliyaata ee lagu tilmaami karo **Abwaan:**Abwaan waa qof yaqaan oo aqoon badan u leh, dadka, dalka, deegaanka, Dabaylaha, xiddiginta, Afka iyo dhaqanka Soomaaliyeed, qofka Abwaan loogu yeedhayaa waa inay u dheertahay garasho badan oo uu dheeryahay bulshada ee eebbe u dhaliyey.Siyaad wuxuu ahaa nin aad u garaad badan,codkar oo aftahan ah, geedka ama goobta uu joogana isaga uun la dhegaysto, gartiisa marsan yaqaan, gartuu doonana doodin yaqaan , wuxuu ahaa nin dhaqan iyo af yaqaan ah, dad iyo dal yaqaan ah, Siyaad wuxuu ka tegay sheekooyin badan oo geyiga Soomaaliyeed ka caan ah, kuwaasoo noqday maahmaaho ama arrimo dhinaca dhaqanka loo adeegsado, ilaa maanta garti iyo goobihii Siyaad geed walba waa laga sheega oo Soomaalidu degto.Sooyaalkiisa iyo sheekooyinka lagu yaqaan Siyaad ee uu ka tegay haddaan soo qaadano mid ka mid ah:Waxaa dhacday in ammin laga joogo ka badan 100 gu' in Siyaad dheryo dhoob nin ay isku hayb yihiin oo reerka la yiraahdo Duduble ah uu diley, nin Majeerteen ah, waa soomaali iyo dhaqankeeda, oo waana wada degi jireen, kala guursan jireen, is dili jireen, kana heshiin jireen.Aanba iraahdo waa dhaqan cara edge ka jira, teer iyo haabiil in dil gar ah ama gardaro ahi dhacee, markii labadaa nin is dileen ayaa waxaa arrintii ku soo baxay, ergooyin ka kala socda labadii reer ee dhibka iyo dhabaqadu kala gaartey.Reerkii Duduble wuxuu garowsaday inay naf gooyeen, lagana rabo inay magdhaw ka bixiyaan oo kala geed fariistaan dhibkii dhacay, beeshii kale ee dhibka loo geystay.Duduble inuu magtii bixiyo ayuu ogolaaday majeerteenna ballan ayey dhigteen, odoyaashii Duduble oo ku tala jira iney geelii qaybsadaan oo sidii magta loo qaybsan jirey, Jufo iyo qubane laga dhigo, Jufadii wax dishayna, Afar meelood qaadato meel qaadato keligeed, Saddex meeloodna qubanaha loo qaybiyo beesha inteeda kale, waa habka ay soomaalidu magta iyo dhiigga u qaybsate. ayaa siyaad yiri arrintaan aniga iiga dambeeya, dood iyo wax is weydiin badan kaddib waxaa dhacday in laysku raacay in Siyaad arrinkaas ka odayeeyo, wuxuu go'aamiyana lagu raaco.Siyaad ayaa beeshii Duduble ka codsadey inay keenaan 100 Ceesaamood, ceesaantu waa marka aysan curan meesiga ri`yaha mana laga horena looma maqan ceesaan mag lagu dhiibayo, arrintii waa laga yaabay, dadkii horese dad maskax furan oo balanta fuliya ayay ahaayeen, haddiiba hore loogu qoor dhiibtey Siyaad lalama doodine aan aragno ayaa la yiri waana la yeelay.Siyaad maalintii loo balansanaa magta inuu beeshii Majeerteen ku wareejiyo, ayuu wuxuu gole keenay 100 ceesaamood, wuxuuna beeshii dilka loo geystay ee magta sugeysay u sheegay inuu u wado 100 ceesaamood.Qoladii Majeerteen ayaa ku warcelisay, Siyaadoow nin dhintey boqol halaad ayaa laga dhiibaaye dhaqankeennuna ahaaye, sideey ku dhacdey inay 100 ceesaamood mag u qaadano, dadku ma ahayn dadka maanta jooga ee bur la duulka ah, ee waxay ahaayeen bulsho garaadkeedu shaqeeyo, qofkana waa la jirrabi jirey hadduu wax suurtagal ah la yimaadana, waa laga garowsan jirey.Siyaad waxaa la weydiiyey sidey ku dhici karto in mag ceesaamo loo qaato, waxaana looga fadhiyaa siduu ku qancin lahaa, beesha magta rabtay. Wuxuu yiri: **RI`DULabo Ragga ayey ka raacdaa ee ku qaata Labo dumarka ayey ka raacdaa ee ku qaataLabo fardaha ayey ka raacdaa ee ku qaataLabo geela ayey ka raacdaa ee ku qaataLabo Lo'da ayey ka raacdaa ee ku qaataLabana intaas oodhan ayey sii dheertahay ee ku qaata Laba ragga ayay ka raacdey:**Haarka ama taaha iyo hareedka ragga ayey ka raacdaa ee ku qaata, oo Orgigu ragga wuxuu uga egyahay hareedka oo garkaa iyo haarka ama taaha oo arigu markii uu jiranyahay wuxuu u riimaa sida ragga.**Laba dumarka ayay ka raacday:**Labaca iyo labada naas dumarka ayey ka raacdaa ee ku qaata, oo ri`du labaca dumarka oo kale ayey leedahay xubnaha jalaqsan iyo laba naas oo qura waana arrin ay wadaagaan.**Laba Fardaha ayay ka raacday**Gurxanka iyo gaadiileyska Fardaha ayey ka raacdaa ee ku qaata, oo ri'du sida fardaha oo kala ayey u gurxantaa marka ay maqasha uciyeyso, sida fardahana waa u gaadiileysaa ama u qoofaafisaa. **Laba Geella ayay ka raacday**Qatinka iyo qaroomashada Geela ayey ka raacdaa ee ku qaata, oo ri`du inta geelu qatimo iyo in kasii

badan ayey biyo moogaan kartaa, qaroomashadana ama saloolashada ri'du geedaha wey saloolataa si kala haddii loo dhigana xilliga jiilaalkaa markii ay oonto waxay xagataa qaroonka geed nugulkaa waxayna ka heshaa qolof qoyaan leh oo ka nafaqo badan dhirta kale ee qalalan.**Labana Lo`da ayay ka raacday.**Qoobka iyo qanaanta Lo'da ayey ka raacdaa ee ku qaata,oo ridu qoobka lo'da ayey uga egtahay qanaantana wey uga egtahay oo sinaha ah, markale qanaan waxaa la yiraa foosha lo'da iyo riyaha labadaas midda uu ula jeedey ma kala sixikaro.**Laba waa dheertahay**Labana waa sii dheertahoo, labo qodxood dhexdood ayey iska seddaa laba jirna caano ayey ku seexisaa, ee ku qaata,oo ri`du meel aan xoolaha kale wax kala bixi karin ayey wax ka raadisaa sida laba qodxood caleen yar oo ku dhextaal ama xaluul geed aay hoos gasho oo aan xoolaha kale gelin,iyadoo si dhib badan u soo qaraabatay ayey hadda laba jir caano ku deeqdaa

Nimankii majeerteen xujadaas xayeysiinta wadata wax aay ku beeniyaan waa waayeen arigiina sidaas ayey ku qaateen haseyeeshee siyaad wey habaareen waxayna yiraahdeen "ma laba labeeyey labo aan isgeeyni kaa hartay! Habaarkaas siyaad waa ku dhacay oo illaa hadda faracii siyaad labo isla dhalatay ma dhaafo.Meeshii arrintaasi ka dhacdayna waxay ahayd meel gaalkacyo udhow oo loogu magacdara **"Garawgii mag arile**" waxaan kaloo maqlay nimanka magta ariga loo siiyey iney ahaayeen Ciise maxamuud oo arrintaas darteed loogu yeero Ciise riyoole:Waxaa dhacdey in mar dambe oo waayo laga joogo, majeerteenku diley nin kale kaddibna sidii xeerku ahaa ee ay iyaguba fallen waxay keen Boqol riya ah, taasoo muujineysa inaysan ku qancin magtii hore ee ay ka falcelinayaan iyaguna markooda. Markii Siyaad dheryodhoob loo keenay magtii riyaha wuu ka biyo diiday isagoo weli wada akeekim iyo jiribkii lagu yaqaanay ayuu weydiin hor dhigey oo yiri: Sidee baan mag rageed ri`yo ugu qaata?Qoladii riyaha keentayna waxay yiraahdeen intii shalay aannu ku qaadanay ku qaado!Siyaad wuxuu yiri haddaad adinku ku qaadateen anigu seddax ay tahay RI`DU ayaanaN ku qaadanayn, waxaa la weydiiyey maxay tahay saddexdaasi? Wuxuu Siyaad yiri:**Rida haddii roob ka raago ma sugatoHaddii roob ku riimana unma gegsato oo adkeysi ma lehHaddii roobku uu ka roorana ma raacdo oo hayaan dheer ma geli karto.**Seddaxdaas ayaanana ku qaadanayn, Siyaad shalay lix waxyaabood oo laba laba ah lagu qaato Ri`da ayuu sheegay, haddana saddex iimood oo ay leedahay ayuu hordhigey nimankii magta inay markooda u bixiyaan rabay, xeerka Soomaaliduna waa in qofku wuxuu ku qanco ay u qaadmaan wuxuusan ku qancina uusan u qaadmin. La soco qaybaha kale W/Q: Abwaan Maxamed Xuseen Faarax.